



Waxyaabaha ay qoysasku u baahan yihiin inay ka ogaadaan xagaaga iyo sanad dugsiyeedka 22/23

Xaggaaga 2022

- Dhammaan ardayda dhigata DPS waxaa lasiiyay Chromebook Lenovo ah iyo jaajar si loo isticmaalo sanad dugsiyeedka 21/22.
- Ardayda ayaa **haysan doonaan** Chromebook-yada Degmadooda xilliga xagaagii si ay u sii wataan waxbarashada isla markaana marin ugu helaan kheyraadka ka baxsan fasalka.
 - Haddii ardaygaaga uu qalin jabinayo, u wareegayo dugsi jaatar ah, ama gebi ahaanba iskaga tagayo degmada, Chromebook-ga degmada waa in lagu soo celiyo dugsi. Haddii aan la soo celin chromebook-ga, waxaa lagugu soo dalaci doonaa \$280 oo ah khidmadda beddelaadda.
- Ardayda waxay u baahan karaan inay u chromebook-yadooda degmada u isticmaalaan Barnaamijka Waxbarashada Xaggaaga ee Summer Connections iyo fursadaha kale ee waxbarasho ee ay heli karaan.

Sanad Dugsiyeedka 22/23

- Haddii ardaygaaga uu ku jiray Dugsi DPS ah sanadkii hore, waxay Chromebook-ga degmada qaateen xagaagii. Haddii ay u baahdaan inay bedel u helaan aaladooda, waxay la xiriiri karaan hawl-wadaha/wakiilka tikniyoolajiyadda iskuulka.
- Ardayda dhigata fasalada 2-aad - 12-aad waxay chromebook-gooda u qaadan doonaan guriga maalin kasta si ay u sii wataan ka-qaybgalkooda iyo waxbarashada fasalka ka baxsan.
- Haddii ardaygaaga u baahan yahay marin u helitaan internet lagu kalsoonaan karo, waxay hotisboot ka codsan karaan dugsiyadooda.
 - Comcast ayaa sidoo kale waxay internet lacag la'aan ah siisaa qoysaska u qalma.
- Markaad diiwaangelinayso ardaygaaga, iska hubi inaad si taxadir leh dib ugu eegis ku sameeyso Heshiiska Aaladda (oo ku lifaaqan halkaan hoose sidoo kalana ku jirta waraaqaha diiwaangelinta) si aad u fahamto waajibaadka kaa saaran helitaanka Chromebook-ga degmada.

Wixii cilado ah ee la xiriira la tacaalida Chromebook-ga ardayga **inta lagu jiro sanad dugsiyeedka**, fadlan la xiriir dugsiyeedka si aad u ogeysiiso, waxayna ka shaqeyn doonaan inay kaa beddelaan chromebook-ga.

Wixii cilado ah ee la xiriira la tacaalida Chromebook-ga cunuggaaga **Xilliga xagaaga**, la xiriir Waaxda Adeegyada Tiknolojiyadda (DOSS) Khadka Taageerada Teknoolajiyada ee Ardayda iyo Qoysaska ee 720-423-3136.

Kheyraadka loogu talagalay Qoysaska iyo Ardayda

- [Su'aalaha Inta Badan La Iska Weydiyo Guri u Qaadashada Chromebook-ga Qoysaska](#)
- [Macluumaadka Loogu Talaglaay Waalidiinta ee Ku Saabsan Teknoolajiyada](#)
- [Heshiiska Aaladda Mytech Chromebook](#)
- [Heshiiska Isticmaalka La Aqbali Karo ee Teknoolajiyada ee loogu talagalay Ardayda](#)
- [Filashooyinka, Masuuliyadaha, iyo Talooyinka Ku Aadan Chromebook-ga](#)
- [Heshiiska Aalada Hotisbootka \(Haddii internet loo baahan yahay\)](#)
- [Comcast Internet Essentials - Internet lacag la'aan ah oo loogu talagalay qoysaska u qalma](#)